


# Ogow xaqiiqooyinka ku saabsan COVID-19



## Waa maxay COVID-19?

COVID-19 waa cudur cusub oo hargab u eg oo uu sababo fayraska cusub ee korona. In

kastoo dadka badankood ay la kulmaan astaamo / xanuun khafiif ah keliya, dadka qaar ayaa si daran ula bukooda oo u dhinta infekshinka. COVID-19 aad ayuu u faafaa. Waxaan haynaa dawooyin caawiya dadka si daran ula xanuunsan cudurka laakiin ma jirto daaweyn wax ku ool ah.



## Sidee buu ku faafa fayraska korona?

Dadka qaba astaamaha iyo kuwa aan astaamaha qabin ayaa asal ahaan COVID-19 ku faafiyo dhibcaha neef-mareenka ee soo baxo marka qof cudurka qaba qufaco, hindhiso ama hadlo. Dhibcahaani ayaa cudurka qaadsiiyo dadka kale markay gaaraan goob qoyan oo ah sanko, afka, cunaha, indhaha ama sambabada qofka kale. Waxaa la rumeysan yahay in tani ay badanaa dhacdo markay dadku isku dhow yihiin – isku jiraan in ka yar lix fuud. COVID-19 ayaa sidoo kale ku dhici kara qofka marka qofku taabto shay uu fayrasku dul saaran yahay kadibna uu taabto afkiisa, indhihiisa, ama sankiisa.

## Maxay yihiin astaamaha COVID-19 iyo intee ayay dhan tahay darnaashada COVID-19?

Markuu ku dhaco cudurka, bukaanada COVID-19 waxay yeelan karaan astaamo kala duwan. Dadka qaba cudurka badanaa ma qabaan wax astaamo ah haba yaraatee ama waxay qabaan astaamo aad khafiif u ah oo u eg kuwa hargabka. Dadka qaarna waxay la kulmaan astaamo daran oo u baahan isbitaal dhigid, daawo iyo mararka qaarkood in lagu xiro qalabka hawo-siinta. Dadka yeesho astaamaha daran ee nafta halis galinaya badankood waa kuwo da' weyn ah

waxayna qabaan cudurada raaga. Waxaa la arkay caruur iyo dhalinyaro qaangaar ah oo caafimaad qaba kuwaasi oo si daran ula xanuunsaday cudurka una baahday isbitaal dhigid.

## Astaamaha



Qufac



Qarqaryo



Qandho



Cune-xanuun



Xanuun murqaha ah



Neefta oo yaraato ama neefsashada oo dhib ah



Luminta dareenka dhadhanka ama urta oo cusub



## Yaa halis ugu jira cudurka?

Dhammaanteen halis ayaannu ugu jimaa cudurka – fayraskani si fudud ayay dadku iskugu gudbiyaan. Xitaa waxaa la muujijey inay gudbin karaan shakhsiyaad qaba astaamo yar ama aan qabin astaamo. Waxaanu hadda fahamsanahay in dadka waayeelka ah, kuwa qaba cudurada raaga, kuwa ku nool goobaha daryeelka kooxeed, iyo shaqaalaha daryeelka caafimaad ay si gaar ah halis ugu jiraan inuu ku dhaco xanuun halis geliyo noloshu.



## Sidee ayaan cudurka uga ilaalin karaa naftayda iyo dadka kale?

### Tallaabooyinka aad qaadi karto waxa kamid ah:

- Markaad bulshada dhex joogto, dabool afkaaga iyo sankaaga - xiro maaskaro
- Si joogto ah u dhaq gacmahaaga
- Lix fuud (laba tallaabo oo waaweyn) ka fogow dadka aan ka tirsanayn gurigaaga (kala fogaanshaha jireed)
- Ka fogow dadka badan
- Joog guriga oo ka fogow dadka kale haddii aad xanuunsan tahay
- Nadiifi oo jeermiska ka dil sagxadaha iyo walxaha la taabto
- Haddii aad isku aragto astaamaha cudurka adigoo shaqada ku jiro ama bulshada dhex joogo, ku noqo gurigaaga, is-gooniyeel oo la xiriir daryeel caafimaad bixiyahaaga
- Haddii aad ogtahay inaad hindhisi doonto - ka fogow dadka kale oo dabool afkaaga iyo sankaaga (ku dabool tiish ama xusulka xitaa markaad xiran tahay maaskaro)
- Haddii aad tahay qof waayeel ah ama aad qabtid cudurada raaga – agg joog gurigaaga, ka fogow inaad jir ahaan u dhawaato dadka kale

**Helida dokumintiga:** Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama [COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us](mailto:COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us) .

**Oregon**  
**Health**  
Authority

QAYBTA CAAFIMAADKA  
DADWEYNAHA